

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD



ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

SANADKA 21 ^{AAD}	CADADKA 8 ^{AAD}	TAARIKH: 04/08/21	Lam. 04
---------------------------	--------------------------	-------------------	---------

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

SHARCIGA IIBKA DHULKA LAANTA BANGIGA DEGMADA
GAALKACYO DOWLADDA PUNTLAND

TUSMADA	
Qeybta 1 ^{aad}	<i>Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah</i> libka dhulka Laanta Bangiga Degmada Gaalkacyo Dowladda Puntland
Qeybta 2 ^{aad}	<i>Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 3 ^{aad}	<i>Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 4 ^{aad}	<i>Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 5 ^{aad}	<i>Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH



DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA



ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lr.04 ee 4^{ta} Agoosto 2021, kuna saabsan libka dhulka Laanta Bangiga Degmada Gaalkacyo Dowladda Puntland

Madaxweynaha Dowladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80^{aad} iyo Qodobkiisa 52^{aad} farqaddiisa 3^{aad}

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/42/2021, kuna taariikhaysan July 22, 2021.

Markuu tixgeliyey: Muhiimada Xeerkani u leeyahay Dowladda Puntland

Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda:

Qodobka 1^{aad}

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen libka dhulka Laanta Bangiga Degmada Gaalkacyo Dowladda Puntland.


Qodobka 2^{aad}

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda Puntland.

Qodobka 3^{aad}

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.


Siciid Cabdullaahi Deni
Madaxweynaha Dowladda Puntland



DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILADA



ولاية بونت لاند الصومال
مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:- XGGW/DPL/ 42/2021 Garoowe, Khamiis, Taariikh:- **22/07/2021**

Ku:- Madaxweynaha Dawladda Puntland

Garoowe

Ujeedo:- **Ansixinta Iibka Dhulka Laanta Bangiga Degmada Gaalkacayo**

Mudane Madaxweyne,

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU:

MARKUU ARKAY:-

MARKUU ARKAY:-

MARKUU ARKAY:-

MARKUU TIX-GELIYEY:-

MARKUU ARKAY:-

WUXUU GUDDOOMIYEY:-

Ansixinta Iibka Dhulka Laanka Bangiga Degmada Gaalkacayo.


Wada Shaqayn Wacan

Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.



DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAA LIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA



OFFICE OF THE PRESIDENT
PUNTLAND STATE OF SOMALIA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

Ref: MW/DPS/ 128 /2020

Garowe

June 21, 2021

Ku: Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Dowladda Puntland

Ujeeddo: Ansixin iibka dhulka Laanta Bangiga ee Degmadda Gaalkayo.

Mudane Guddoomiye, waxaan halkaan kuugu soo gudbinayaa Ansixinta iibka dhulka Laanta Bangiga ee Degmadda Gaalkayo oo lagu ansixiyey shirkii Golaha Xukuumadda Dowladda Puntland 10^{-kii} June, 2021, dhulkaas oo cabirkiisu yahay 45mx50m waxaana lagu iibinayaa lacag dhan \$400,000 ilaa \$500,000.

Dhulkaas oo ay lagama maarmaan noqotay in la iibiyo, ka dib markii uu ku habboonaan waayey in uu bangigu ku sii shaqeeyo, lana doonayo in dib u casriyeyn lagu sameeyo Laanta Bangiga ee Degmadda Gaalkayo.

Sidaa darteed, Mudane Guddoomiye waxaan ka codsanayaa Golaha Wakiiladda Dowladda Puntland in ay ka doodaan kaddibna ansixiyaan si waafaqsan Qodobka 52^{-aad} farqadiisa 3^{-aad}, ee Dastuurka Dowladda Puntland.

Wada shaqeyn wacan,


Siciid Cabdullaahi Deni
Madaxweynaha Dowladda Puntland.

